# Albaabka adeegyada [tjänsteportalen] ee Shirkadda guryaha [Sandvikenhus]

Markii aad tixraacaysid qodobada buugani-warbixineed ku qoran, waa inaad aqalkaaga ku sugan tahay. Tan kale, waa inaad isticmaasha kombyuutar/taleefan/tablett. Kuwaasoo ku xiran khadka internet [bredband], tusaale adigoo isticmaalaya qalabka [router] ama fiilo ku rakiban gidaarka guriga ee khadka laga soo qaato.

## TALLAABADA 1:AAD

### U goob-maax albaabka adeegyada [tjänsteportalen]

Adeegso aqriyeyaasha goob-maaxyada (Opera, Safari, Chrome, Internet Explorer, Firefox iwm.)



Qor adreeska albaabka **https://portal.stadsnat.sandvikenenergi.se**




Dalbashada adeegga kahor, waa inaad iska-diiwan gelisa albaabka adeegyada [tjänsteportalen]. Jag-sii afargeysta ku qoran ”Registrera här”.

## TALLAABADA 2:aad

**Iska-diiwangeli albaabka adeegyada [tjänsteportalen].**
Ku qor warbixin-shaqsiyeedkaaga kaddib dooro password, (passwordiga waa in uu ka kooban yahay 6–16 xarfo/lambarro). Sida aad warbixin-shaqsiyeedka ku muujiso awgeed, ansixi shuruudaha kaddib jag-sii ”Registrera användare”.




Waa inaad caddeeysa in adreeska adeegyada lagugu soo hagaajin doono u sax yahay, taasoo ku muujin karto adigoo riixa ”Nästa”. Kaddib diiwangelinta way dhamaatay.



## TALLAABADA 3:aad

**Passwordigaaga ku gal albaabka adeegyada [tjänsteportalen]**
Haddii aad ku talo jirto inaad adeegyo dalbato, waa inaad passwordigaaga akawntigaaga ku gasha. Kaddib markii aad adreeskaaga caddeeyso ayay afargeysta albaabka lagu galo ku soo ifbixi doona.

Ku qor adreeska email-kaaga iyo passwordigii aad diiwangelisay, kaddib jag-sii ”Logga in”. Imminka waxaad dalban karta adeegyada.




## TALLAABADA 4:aad

**Dalbashada adeegyada**
Haddii aad doonayso inaad dalbato adeegyada internet, waxaad riixda badhanka ku qoran ”Bredbandstjänster”. Kaddib kala dooro adreeyada iyo shirkadaha adeegyada laga helo.



Dooro adeeg kaddib caddeeynta doorashadaada darteed jag-sii ”Aktivera”.




Adigoo passwordkaaga isticmaalayo caddee dalbashadaada, kaddib qor taariikhda aad doonaysid in laga shaqaysiiyo. Sida aad ku caddeeyso dalbashadaada awgeed, waa inaad aqbasha shuruudaha adeeqyada u degsan, kaddib jag-siisaa ”Nästa”.



Markii adeegga laga shaqaysiiyo, jag-sii ”Stäng”. Sida u adeegga kugu shaqeeyo awgeed, waa inaad kombyuutarkaaga damisaa kaddib dib u kicisa.




## TALLAABADA 5:aad

**Kombyuutarkaaga dami kaddib kici/daar.**

Halka ay ku qoran tahay [start-menyn] ee kombyuutarka dooro ”Starta om”. Sida u kugu shaqeeyo adeegga internetka ee aad dalbatay, waxaa mararka qaarkood loo baahan yahay in kombyuutarka la dammiyo kaddib la kiciyo/daaro.



# AKAWNTIGAYGA

## Hawl ka qabashada akawntigaaga iyo adeegyadaada

Hoosta halka ay ku qoran tahay ”Mitt konto”, waxaa ku qoran adeegga aad dabbatay oo imminka dhaqan gelisay. Halkaan ayaa akawntigaaga ka maamuli karta, sida faahfaahinta xiriirka, beddeli karta passwordiga, beddeli ama ciribtiri karta adeegyada aad dalbatay.

